



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 11, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha (**CME-yada iyo Daryeel bixiyayaasha**, fadlan la wadaaga kuwa hela adeegyada I/DD iyo qoysaskooda. Waad mahadsan tihiin.)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Shaqooyinka kooxda adeega Compass Project

Toddobaadka xiga, ODDS waxay warqado muhiim ah ku soo diraysaa Adeega Boostada ee Maraykanka kuwaasi oo ku dhawaaqi doonta tallaabada xigta ee Compass Project: shaqooyinka kooxda adeega.

### **Compass Project: Doorashadaada. Jidkaaga. Mustaqbalkaaga.**

ODDS waxay abuurta Compass Project si loo wanaajiyo habka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku (I/DD) uga qayb qaataan adeegyada. Mashruuca waxaa ka go'an bixinta:

- Macluumaad si fudud loo heli karo oo si sahlan loo fahmi karo.
- Nidaam qorsheyn oo fudud oo dabacsan.
- Adeegyada iyo qorshaha taageerada oo adiga lagula qorsheeyay.

### **Kooxaha adeega iyo heerarka lacageed oo cusub**

Tallaabadu u horreysa ee Compass Project waxay ahayd abuurista Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA). Qiimeeyayaasha iyo maamulayaasha kiiska ayaa u isticmaala ONA in ay su'aalo weydiiyaan oo helaan macluumaad ku saabsan baahiyaha taageero ee qofka.

**Tallaabada xigta waa ogaanshaha kooxda adeega ee qofka ee loo qoondeeyay.** Kooxaha adeegu waxay ku saleysan yihiin da'da qofka iyo baahiyaha taageero.

Toddobaadka soo socda, ODDS waxay warqado boosta ugu soo diraysa kuwa hela adeegyada soo socda: guryaha dadka waayeelka ahi koox ahaanta u degan yihiin, taageerada hawlaha maalintii iyo shaqada. Warqadu waxay dadka ku wargelin doontaa kooxda adeega ee ay ka tirsan yihiin.

Luulyo 1, ODDS waxay hirgelin doontaa heerarka lacageed oo cusub oo loogu talagalay adeegyada ku saleysan kooxda adeega ee qofka. **Fadlan ogow:** Kuwa helaya warqadaha toddobaadka soo socda, kooxdooda adeegu ma saameynayso adeegyada ay helaan. Qoondeyntooda kooxda adeega waxay kaliya saameynaysaa sida ODDS lacagta u siiso adeeg bixiyayaasha.

Shaqaalaha ODDS iyo aniguba waxaan rumeysanahay in isbeddelku noqon karo mid cabsi leh oo adag. Haddii aad tahay maamulaha kiiska, daryeel bixiye, waalid, mas'uul ama qof hela adeegyo, waxaa naga go'an in aanu ku taageerno tani iyo isbeddelada mustaqbalka ee nidaamka oo dhan.

### **Ilaha Compass Project**

- Ilaha loogu talagalay Dadka iyo Qoysaska: <https://go.usa.gov/xz2Az>.
- Ilaha loogu talagalay Maamulayaasha Kiiska iyo Daryeel bixiyayaasha: <https://go.usa.gov/xz2AS>.
- Xarunta Tababarka Compass Project — Fiiro tababaradii la soo dhaafay iyo jadwalka tababarada soo socda: <https://go.usa.gov/xz2sr>.

### **Tababarka “Compass Overview”**

- Tababarkani waxaa la siin doonaa dadka qaba I/DD iyo qoysaskooda si ay u yeeshaan fahamka guud ee Compass Project iyo sida uu u saameyn doono iyaga.
- Goorta 6 ilaa 7:30 galabnimo Maarso 16
- Goobta: Ku soo biir Zoom-ka ka dhacaya <https://bit.ly/346jWMJ>.

Fadlan ka faa'iideeyso ilahani. Waxaanu isbeddeladani sidoo kale la socodsiinay maamulayaashaada kiiska iyo daryeel bixiyayaashaada. Waxaanu kugu dhiirigelinaynaa in aad la hadasho maamulahaaga kiiska si uu kaaga caawin karo wixii su'aalo ah ama tabashooyin ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-  
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).